

## Xeerka Xogta Sirta ah ee WA Notify

Xeerkaan xogta sirta ah waxa uu qabanayaa aalada abka COVID-19 WA Exposure Notifications (Ogaysiisyada Qaadista Caabuqa ee Washington). Tani waa tignooloojiyada rasmiga ah ee ogeysiiska qaadista caabuqa ee Gobalka Washington, laguna abuuray korjoogtada iyo taageerada Washington State Department of Health (Waaxda Gobalka Washington uqaabilsan Caafimaadka).

## Xog noocee ah ayaan aruurinaa oo aan isticmaalnaa?

Si uu u waafaqo ujeedada ay u sameeyeen Google iyo Apple, WA Exposure Notifications (oo loo yaqaano WA Notify (Qalabka Ogeysiiska WA)) waxaa loo sameeyay inuu difaaco sirta isticmaalaha oo ah muhiimada koobaad. WA Notify waxay aruurisa xogtaan, taasoo aysan ku jirin xog ku aqoonsanaysa:

### Koodhadhka Iskudhafan

- Koodhadhka Iskudhafan waxaa dhanka aalada Bluetooth ka isku dhaafsada taleefanada dadka isticmaala WA Notify marka ay isku dhawaadaan.
- Koodhadhka Iskudhafan waxaa ka shaqeeya oo nidaamiya taleefankaaga casriga ah, mana maamulo abka WA Notify.
- Koodhadhka Iskudhafan waxaa loo adeegsadaa kaliya in loo oggolaado in WA Notify iyo taleefankaaga casriga ah ay hubiyaan suurtagalnimada inaad la joogtay qof qaba COVID-19.
- Koodhadhka Iskudhafan waxaa loo nidaamshaa ugu badnaan inay shaqeeyaan 14 maalmood.

### Lifaaqa Xaqiijinta

- Haddii caabuqa COVID-19 lagaa helo, waaxda caafimaadka bulshaduna kulasoo xariirto, waxay ku waydiin doonaan inaad isticmaasho WA Notify. Haddii aad isticmaasho, waxay ku siin doonaan lifaaqa xaqiijinta si aad u geliso WA Notify.
- Gujinta lifaaqaaga xaqiijinta waxay u sahlaysaa koodhadhkaaga isku dhafan in lawadaago si dadka kale ee isticmaala WA Notify ee kuu dhawaa si qarsoodi ah loogu digo inay suurtagal tahay inay qaadeen caabuqa.
- Waxaad go'aaminaysaa inaad gujiso ama aadan gujin lifaaqa xaqiijinta si aad ula wadaagto isticmaalayaasha kale ee WA Notify.

### Liiska Icticmaalka

- Si lamid ah ablikeeshin kasta ama adeeg kasta oo internet ah, WA Notify wuxuu si ootomaatig ah u abuurayaa liiska xogta marka aad adeegsato adeegga. Liisaskaan waxaa ku jira qaar kamid ah xog ku saabsan taleefankaaga casriga ah. Waxaan u adeegsanaa xogtaan si aan u xalino ciladaha ka jira WA Notify.
- Liisaskaan kuma jiraan koodhadh iskudhafan ama lifaaqyada xaqiijinta loomana adeegsan karo labada koodh midkoodna in lagugu raadiyo adigga ama taleefankaaga.
- Liisaskaan waxaa loo tiraa si ootomaatig ah 14 maalmood kadib marka lasoo saaro.

## **Xogta Qiimeynta**

- Haddii aad doorato inaad furto qiyaasaadka dheeraadka ah, xog kooban oo iskudhahan ayaa lala wadaagi doonaa waaxda caafimaadka dadwaynaha si kor loogu qaado shaqada ablikeeshinka.
- Xogtaan waxaa ku jira cabirada ku aadan sida ablikeeshin loo isticmaalay. Kuma jiraan wax xog ah oo loo adeegsan karo in lagugu aqoonsado.
- Waxaad dooran kartaa inaad xogtaan cid la wadaagin adoo daminaaya qaybta la wadaagista xogta qiimaynta ee ablikeeshinka.
- Naqshad ahaan, WA Notify ma qoro xogta goobta ee taleefankaaga mana aruuriyo ama sheego xog kugu xiraysa adigga ama taleefankaaga koodhadhkooda isku dhafan ama koodhadhka xaqiijinta ee aad soo saartay.

## **Yaan la wadaagnaa xogtaada?**

Ma jiri doonto wax kamid ah xogtaada oo aruurinayno ama la wadaagayno si iskeen ah cid kale, illaa inaad geliso lifaaqa xaqiijinta maahee. Haddii aad geliso, WA Notify ayaa la wadaagaaya koodhadhkaaga iskudhahan taleefanada kale ee u dhawaa taleefankaaga. Lifaaqa xaqiijinta kuguma aqoonsan karo qof kale oo aan gali karin taleefankaaga.

## **Sidee ayaan u difaacaynaa xogtaada?**

WA Notify ayaa difaacaya koodhadhka isku dhafan asagoo adeegsanaaya Exposure Notification Framework (Naqshada Ogaysiiska Qaadista Caabuqa) ee Google iyo Apple kaasoo ay ku jiraan shuruudo aad qaas u ah oo la xariira sida loo qarinaayo loona dirayo koodhadhka. WA Notify ma kaydinaayo ama masoo saaro koodhadhkaaga iskudhahan — taleefankaaga ayaa soo saara.

## **Xaquuqdaada ku aadan xogtaada**

Maadaama aysan jirin qaab aan lifaaqa xaqiijinta ama kaydka isticmaalka ablikeeshinka kuugu xiri karno adigga anagoon adeegsan taleefankaaga casriga ah, ma jirto qaab aan si ammaan ah kugu siin karno ama ku tiri karno xogtaan haddii aad naga codsato. Adigga ayaa maamula adeegsiga WA Notify. Taleefankaagu waa inuu kuu sahlaa inaad iska xirto Ogaysiisyada Qaadista caabuqa ama aad tirto liiska qaadista caabuqa ee ku kaydsan taleefankaaga markaad doonto. Waxaa intaas dheer, waad ka saari kartaa aaladaada WA Notify markaad doonto. Haddii aad ka saarto, dhammaan koodhadhka isku dhafan ee la kaydiyay waa la tirayaa.